


Varicella (Hablo-baas)

Warqadda Xaqiiqda



Varicella, oo sida caadiga ah loo yaqaan hablo-baas, waa infekshan aad u faafa. Waxaa keena fayraska varicella zoster.



Qof kasta ayaa u bukoon kara hablo-baasta.

Dadka la tallaalo way yar tahay inay ku dhacdo hablo-baas, laakiin weli way dhici kartaa. Kiisaska noocaas ah, badanaa waa qaab fudud.

Calaamadaha iyo Astaamaha



Furuuruc



QanEdho



Daal Dareemid



Amateedka oo xumaada

Qandho, dareemid daal, amateedka oo xumaada, iyo madax xanuun ayaa soo muuqan kara maalin ilaa laba maalmood kahor intaan firiiricu kobcin. Firiirica ayaa laga yaabaa inay marka hore kasoo muuqdaan wejiga, laabta, iyo dhabarka kadibna ku fidaan jirka intiisa kale. Tan waxaa ku jira gudaha afka, baalasha indhaha, ama xubnaha taranka. Firiirica ayaa isu beddela cuncun, fin-dheecaan dheecaan ka buuxo kaas oo qub-dhaca toddobaad gudihi. Calaamadaha badanaa waxay soo baxaan 14 ilaa 16 maalmood cudurka kadib, laakiin waxay u dhaxayn karaan 10 ilaa 21 maalmood.

Hablo-baastu waxay noqon kartaa mid aad u daran gaar ahaan carruurta yaryar, carruurta ka weyn 12, dadka waaweyn, haweenka uurka leh, iyo dadka leh habka difaaca liita. Dhibaatooyinka ba'an ee ka yimaada hablo-baasta waa mid naadir ah laakiin waxaa ka mid noqon kara caabuqa bakteeriyada, oof-wareen, caabuqa maskaxda, iyo dhimasho. Dhimashada qaarkeed ee hablo-baastu waxay ku dhacdaa carruurta caafimaad qabta, oo aan la tallaalin iyo dadka waaweyn.



La hadal dhakhtarkaaga haddii aad u malaynaysid inaad qabto hablo-baas. Ma jiro daaweyn gaar ah, laakiin astaamaha waxaa lagu daaweyn karaa dawooyinka aan u baahnayn waraaq dhakhtar.

Ha isticmaalin daawada asbiriin ama dawooyinka ay ku jirto asbiriin si aad uga baabiiso qandhada ilmaha. Tani waxay u keeni kartaa carruurta carqalad dhif ah.

Faafidda Hablo-baasta



Qufaca iyo
Hindhisada



Taabashada tooska ah
adigoo taabanaya
finanka

Fayrasku wuxuu si fudud ugu fidaa taabashada ama neefsashada qurbaha fayraska ee ka yimid finanka hablo-baasta. Sagxadda dusha sare iyo walxaha, sida alaabada lagu ciyaaro, waxay faafin karaan fayraska haddii qof xanuunsan uu taabto iyagoon gacmhooda maydhin qof kalena taabto isla sagxaddii kadibna ay xoqaan indhahooda, sankooda, ama afka.

Kahortagga Hablo-baasta



Tallaalku waa
kahortagga ugu
wanaagsan



Ku dhaq gacmahaaga
saabuun iyo biyo




Ha wadaagina
maacuunka
cunista



Nadiifi sagxadaha
kuwaas oo loo
taabto si joogto ah

Macluumaad Inta Ka-badan, Booqo:



1. www.maine.gov/dhhs/varicella
2. www.cdc.gov/varicella
3. www.cdc.gov/vaccines/vpd/vaccines-age.html (Loogu talogelay tallaalada loo eegayo da'ada)

Waxa kale oo aad ka wici kartaa Maine CDC halkan 1-800-821-5821.